

# MAKTABADHA

Degmo walba oo Finnish ah waxay leedahay maktabad bulsho.

Maktabaddu waa barta kulanka iyo xarunta dhaqanka. Maktabadda waxaa loogu talagalay carruurta, dhalinyarada, haweenka iyo ragga.

Maktabadda waxbaad ku aqrisan kartaa, ku qaadan kartaa waqtiga, kula kulmi kartaa saaxibo oo ka qeybqaadan kartaa dhacdooyin kala duwan.

Shaqaalahi maktabaddu waxay halkaas u joogaan inay ku caawiyaan, ka jawaabaan su'aalahaaga ayna kuu soo bandhigaan maktabadda.

Maktabaddu waa adeeg bilaash ah oo loogu talagalay dhammaan deeganayaasha.

Maktabadda waxaad

- deynsan kartaa buugaag, jaraa'ido, muusig iyo fiidiyowyo
- Iisticmaali kartaa kumbiyuutarada maktabadda iyo qalabyada kale ee korontada
- ka qeybqaato kooxyada aqrinta, dhacdooyinka iyo koorsooyinka
- weydii caawinta xirfadlaho shaqaalahi
- isticmaal dhismaha maktabada, sida qololka aqrinta.

Warbixin badan ee ka timid maktabada iyo websaydyada maktabadaha.

Ku dhawaad dhammaan adeegyada maktabadaha iyo dhacdooyinka waa bilaash.

Waxaad u baahantahay kaarka maktabadda oo shaqeynaya si aad wax u amaahato.

Adeegyada kale waxaa la isticmaali karaa iyadoo aan la heysan kaarka maktabadda.

## Maktabadda waxbaa lagu sameyn loogana qeybqaadan karaa

Waxaa jiro dhacdooyin maktabada ka jiro oo loogu talagalay carruurta, dhalinyada iyo dadka weyn.

Saacadaha sheekada waa sheeko sheegida iyo ciyarta.

Waxaa jiro maqribada suugaanta, kulamada qoraaga, riwaayadaha iyo dhacdooyinka bandhiga ee lagu diyaariiy maktabadda. Dhacdooyinka ay diyaariyeen maktabada waa bilaash.

Maktabado badan waxay leeyihii qololka bandhiga ee la qabsan karo.

Warbixinta dhacdooyinka iyo bandhigyaada waxaa laga heli karaa maktabadaha iyo bogagga intarneetka maktabadaha.

Waxaad ku qabanqaabsan kartaa dhacdadaada gaarka ah maktabadda.

Kambuyuutarada maktabadda waxaad ku aqrisan kartaa imaylkaada, shabakadda ka raadsan kartaa macluumaad kuna daabacan kartaa.

Daabacaadda degmooyinka qaar waa lacag.

Dhammaan kumbiyuutarada waxay leeyihii barnaamijka qoraalka, iyo barnaamijyo kale oo waxtar leh.

Maktabadaha qaarkood waxay ku qalabeysonyihiin sawirayaasha iyo teebabka luuqado kale duwan leh.

Waad isticmaali kartaa goobaha maktabadda.

Dhammaan maktabadaha waxay leeyihii miisas iyo kuraas, kaas oo si xor ah aad ugu isticmaali kartid shaqo ama waqtiga firaaqada.

Maktabado badan waxay leeyihii qolol aad u qabsan kartid tusaale ahaan kulamada dartood.

Maktabadaha qaarkood waxay leeyihii qolka muusiga, halkaas oo aad u aadi kartid tusaale ahaan ciyaaridda biyaanada.

## Waa maxay e-books?

E-books waa buugaag caadi ah, kuwaas oo aad ku aqrin kartid tusaale ahaan kumbiyutarka ama taleefonka casriga ah.



E-books sidoo kale waxaa loogu yeeraa buugaagta korontada.

E-books waxay noqon karaan buugaag aan sheeko aheyn iyo kuwa sheeko ah, tusaale ahaan taxanaha, buugaagta sheekada ama gabayga.

E-books waxaa laga amaahan karaa matabadda sida buugaagta daabacan.

### **Sidee ayaad u isticmaaleysaa e-books matabadda?**

Amaahsiga waxaad u baahantahay lambarka kaarka matabadda iyo lambarka furaha aqoonsiga.

E-books way ku sahlanyihii in lagu aqriyo intarneetka. Markaas uma baahnid inaad dajisato barnaamijyo walbo oo dheeraad ah oo aad ku aqrисати буугаагта. Qalabka waa in lagu xiraa intarneetka, si aad u aqrisid buugga.

E-book ma ahan in si gooni ah loo soo celiyo, si toos ah ayuu ugu soo noqonaya matabadda marka muddada amaahdo dhamaato.

### **Sharchiyada isticmaalka**

Maktabadaha oo dhan waxay leeyihii qeybtooda gaarka ah ee isticmaalka sharchiyada.

Sharchiyada isticmaalka wuxuu qeexaa xaquuqaha iyo doorarka isticmaalaha maktabadda, tusaale ahaan intee shey ayuu macmiilku amaahsan karaa isku mar, iyo sidoo kale sida marka sheeyada la ammaahday la soo celinayo.

Haddii macmiilka uusan u hogaansan sharchiyada isticmaalka, isaga ama iyadu waxay lumin karaan xaquuqda lagu amaahsanayo sheeyada.

### **Maktabadda waxay kuu soo dhoweysaad adeegyada**

Baabuurka maktabaddu waa bas lagu soo raray buugaag iyo sheeyaa kale oo ay maktabaddu leedahay. Haddii aad ku nooshahay meel ka fog maktabadda, waa suurtogal, in meel u dhow gurigaaga uu ku yaal meesha uu istigalo baabuurka maktabaddu. Baabuurka maktabaddu wuxuu raacaa jadwal uu ku tago goobta joogsiga.

### **Buugaagta waxaa lagu dalban karaa luuqado kala duwan**

Waxaad maktabadda ku weydiin kartaa buugaagta luuqadaada gaarka ah.

Waxaa laga dalban karaa maktabadda luqadaha badan. Waxaad ka qaadan kartaa maktabadda deegaankaada.

Waxaad weydiisan kartaa buugaagta dhageysiga maktabadda haddii ay kuu suurtogali weyso inaad aqriso.

Maktabadda deegaanku waxay sidoo kale kaala talin kartaa isticmaalka maktabada luuqada Aastaanta ee [www.viittomakielininkirjasto.fi](http://www.viittomakielininkirjasto.fi).

## **Ku soo dhawow maktabada!**



**KIRJASTO • BIBLIOTEK • LIBRARY**